

Ogeysiin Qoysaska ee Muhim ah

XIDHIDA DUGSIYADA XAGA CIMILADA: DIBUHABAYNTA MAWJADA “CHANNEL 7 NEWS / WHDH”

Mawjada WHDH-TV / Channel 7 “Xoga Duufaanka” waxay qaadanaysaa hab sidii hore ka yare duwan xaga warbixinta xidhida dugsiyada jiilaalka qaboobaha. Waxa muhim ah inay qoysasku ogaadaan isbedelkan si aan jaah wareer u dhicin ama isfahama la’aan xaga inay Dugsiyada Boston la xidhay iyo in kale waqtiga duufaanada barafka.

Waxa raacda liiska shaashada telefishanka laga soo saaro ee degmooyinka idil ee go’aansada xidhida ama dibudhaca furida dugsiyada, mawjada “Channel 7” waxay liis labaad ku muujinaysaa korkeeda isla markaas, taas oo loogu tala galay 10-ka degmo dugsiyeedka ugu waaweyn ee gobolka, ay ku jirto Boston.

Liiskaas “10-ka Waaweyn” wuxu muujinayaa 10-ka dugsi, xataa hadayan ka warbixin in la xidho. Waxa naloo sheegay mid kasta ee 10-ku waa la taxayaa waqti walba sidi la “xidhay” ama ay “furan” yihiin ama -- hadayan weli wax laga maqlin degmada dugsiya ama aan go’aan la gaadhin -- “war ma leh” ama “wax lagaama oga”.

Fadlan ogow: “Boston – CLOSED (WAA XIDHAN TAHAY)” waa fariinta keliya ee tusaysa inaan ardayda laga filayn inay dugsiya ka xaadiraan.

Mida kale fadln ogow in isbedeladan ay khuseeyaan oo keliya mawjada Channel 7 waqtigan. Intaan anagu ognahay, saldhigyada kale ee telefishanka iyo raadiyaha oo dhami waxay ka warbixinayaan xidhida dugsiyada sidii ay horeba u samayn jireen.

Hadaad wax su’aalo ah qabto, fadlan la xidhiidh maamulaha ama madaxa dugsiya ilmahaaga.



[Shaashada sawirka: waa sambal fariin tusaysa dugsi la xidhay siday uga muuqanayso telefishanka.]